IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH

الرسمية الجريدة

EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 17aad Muqdisho 2aa Luulyo 1939 L. 7

جريدة شهرية FAAFIN BIL SOO BAXA

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada J. D. Soomaaliya

QIIMUHU: waa 5 shilin lambar walba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka l aweydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## K O O N T I N

## QAYBTA KOWAAD

### SHARCI

## QAYBTA LABAAD

### X E E R

XEER-SHARCI L. 1 ee 8 Abr. 1989, Kordhin Canshuurta socodka baabuurta. Bog; 335

XEER-SHARCI L. 2 ee 8 Abr. 1989, Canshuurta lahaanshaha Baabuurta yaryar. » 338

XEER-SHARCI L. 3 ee 8 Abr. 1989, Abuurid canshuur lahaanshaha dhismaha daarahaah. » 343

XEER-SHARCI L. 4 ee 8 Abr. 1989, Kordhinta Canshuurta ruqsadda iyo cusbooneysiinta

XEER-SHARCI L. 5 ee 8 Abr. 1989, Kordhinta qiimaha iibsashada Taargada. » 350

XEER-SHARCI L. 6 ee 8 Abr. 1989, Wax ka beddelidda canshaarta Keenidda. » 351

XEER-SHARCI L. 7 ee 8 Abr. 1989, Dib u habayn canshuurta Diiwaangelinta. » 353

XEER-SHARCI L. 8 ee 8 Abr. 1989, Wax ka beddelidda Canshuurta Boollada. » 354

XEER-SHARCI L. 9 ee 8 Abr. 1989, Wax ka beddelidda canshuurta dhoofidda. » 356

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 12 ee 27 Juunyo 1989, Aqoonsi Ururka Samafalka Afrikada Bari. » 357

QAYBTA SAD/XAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGELSIIS IWM.

MAXKAMADAA G. BANAADIR 19.6.89, Lumid Buug Kayd L. 863 ku qoran C/raxmaan Yaasuf Magan L. 149 » 358

MAXKAMADDA G. BANAADIR 4.6.89 Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Maxamed Xasan Axmed L. 150 » 359

MAXKAMADDA G. BANAADIR 24.4.89 Lumid Jeeg War. L. 0092923 ku qoran Cabdiraxmaan Cusmaan Suldaan L. 151 » 360

MAXKAMADDA G. BANAADIR 2.7.89 Lumid 2 J/War. ku qoran Sahra Warsame Cilmi Bootaan L. 152 » 361

MAXKAMADDA G. BANAADIR 2.7.89 Lumid Jeeg War. L. 0444317 ku qoran Saalax Cabdalla Munasar L. 153 » 461

MAXKAMADDA G. W/GALBEED 26.4.88 Lumid Jeeg War. L. 0590736 ku qoran Aadan C/llaahi Nuur L. 154 » 363

MAXKAMADDA G. BANAADIR 27.6.89 Lumid Jeeg War. L. 624245 ku qoran Ibraahim Caadi ahayn L. 155 » 364

SHIRKADDA KAAH PHOTOGRAPHIC SUP- LIES LIMITED S.P.A. Ogeysiis Fadhi Shir aan Caadi ahayn L. 157 » 365

MAXKAMADDA G. BANAADIR 24.6.89 Lumid Jeeg War. L. 1586461 ku qoran Maxamed Faarax Ciise L. 158 » 366

MAXKAMADDA G. MUDUG 20.6.89 Lumid Jeeg War. L. 1575050 ku qoran Aamina Nuur Faarax L. 158 » 367

MAXKAMADDA G. BANAADIR 18.7.89 Lumid 13 Jeeg War. ku qoran Saleebaan Abshir X. Diiriye L. 160 » 368

MAXKAMADDA G. BANAADIR 10.7.89, Lumid Buug Kayd L 3024 ku qoran Sh. Cabdi Sheekh Cabdullaahi L. 161 » 369

## O G E Y S I I S

Bacdamaa ay daahday Faafinta Rasmiga ah waa in loo Tixgeliyaa Taariikhdan ah: 26.7.1989.

QAYBTA LABAAD

XEER—SHARCI

Xxr Sharci lambar 1, taariikh 8.4.1989: Kordhinta canshuuraha socodka baabuurta.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Dekreeto lejislativo lambar 4 ee 28.12.1965 iyo beddelaaddii ka dambeysay (Sharci lambar 12 ee 12.1.1981);

ASAGOO TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in la kordhiyo canshuurta socodka baabuurta;

AYADOO UU SOO JEEDIYEY: Wasiirka Maaliyadda iyo Lacagta;

ASAGOO TIXGELIYEY: Oggolaanshaha Golaha Wasiirrada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Sharci ee soo socda:

Qod. 1aad

Canshuurta socodka baabuurta ee ku xusan Qod. 7aad ee Dekreto Legislativo lambar 4 ee 28.12.1965 iyo beddelaaddii ka dambeysay (Sharci lambar 12 22.1.1981), waxaa laga dhigay sida ku tifaftiran Tabeellaha ku lifaaqan Xeer Sharcigan oo ah qayb ka mid ah.

Qod. 2aad

Waxaa la baabi'iyey sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Xeer Sharcigan.

Qod. 3aad

Xeer sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda. Isla markaana waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacbiga si loogu rogo Sharci.

Muqdisho, 8.4.1989

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

## ALIQUOTE PROPORZIONALI (2)

Le aliquote proporzionali dell'imposta sono stabilite, per anno solare, nelle seguenti misure:

a) autoveicoli adibiti esclusivamente al trasporto di persone per uso privato o di rimessa:

| | | |
|---|---|---|
| — Fino a 8 HP | Sh.So. | 1.980 |
| — da oltre 8 HP a 11 HP | » » | 2.170 |
| — da oltre 11 HP a 14 HP | » » | 3.960 |
| — da oltre 14 HP a 18 HP | » » | 5.280 |
| — da oltre 18 HP a 22 HP | » » | 7.960 |
| — da oltre 22 HP a 26 HP | » » | 10.560 |
| — da oltre 26 HP a 30 HP | » » | 13.200 |
| — da oltre 30 HP a 35 HP | » » | 16.500 |
| — oltre 35 HP | » » | 19.800 |

b) autoveicoli adibiti esclusivamente al trasporto di persone in servizio publico da piazza (TAXI):

| | | |
|---|---|---|
| — Fino a 8 HP | Sh.So. | 1.373 |
| — da oltre 8 HP a 11 HP | » » | 2.059 |
| — da oltre 11 HP a 14 HP | » » | 2.745.50 |
| — da oltre 14 HP a 18 HP | » » | 3.661 |
| — da oltre 18 HP a 22HP | » | 5.491 |
| — da oltre 22 HP a 26 HP | » » | 7.321.50 |
| — da oltre 26 HP a 30 HP | » » | 9.152 |
| — da oltre 30 HP a 35 HP | » » | 11.440 |
| — oltre 35 HP | » » | 13.728 |

c) autoveicoli adibiti al trasporto di persone in servizio publico di linea debitamente autorizzati con regolare atto di concessione:

| | | |
|---|---|---|
| — Fino a 15 HP | Sh So | 2.288 |
| — da oltre 15 HP a 20 HP | » » | 2.860 |
| — da oltre 20 HP a 30 HP | » » | 3.432 |
| — da oltre 30 HP a 40 HP | » » | 4.576 |
| — da oltre 40 HP a 50 HP | » » | 5.720 |
| — oltre 50 HP | » » | 8.580 |

d) autoveicoli e rimorchi compresi i motocarri e motofurgoncini adibiti esclusivamente al trasporto di cose:

| PORTATA | AUTOVEICOLI | RIMORCHI |
|---|---|---|
| | Sh So. | Sh So |
| — fino a q.li 10 | 1.365 | 1.092 |
| — da oltre q.li 10 a q.li 20 | 3.003 | 2.184 |

| | | |
|---|---|---|
| — da oltre q.li 20 a q.li 30 | 4.641 | 3.276 |
| — da oltre q.li 30 a q.li 40 | 6.179 | 4.368 |
| — da oltre q.li 40 a q.li 50 | 7.917 | 5.460 |
| — da oltre q.li 50 a q.li 60 | 9.555 | 6.552 |
| — da oltre q.li 60 a q.li 70 | 11.193 | 7.644 |
| — oltre q.li 70 | 13.650 | 9.555 |

ALIQUOTE FISSE (3)

Le aliquote fisse dell'imposta sono stabilite, per anno solare, nelle seguenti misure:

a) Motocicli, motoleggere, sceoters, motocarrozzette e velicipedi con motore ausilirio per uso privato o in servizio publico da piazza Sh.So. 990.

b) Circolazione di prova, per ogni targa concessa dal Publico Registro Automobilistico:

— Autovettura, autobus, autocarri e rimorchi Sh.So. 6.600.
— Motocicli, motoleggere, scocters, motocarrozzette e velocipedi con motore ausiliario Sh.So. 1.650.

c) Autoveicoli e rimorchi destinati per la loro natura ad usi spechiali diversi dal trasporto di cose, quali ad esempio, trattrici stradali, autoinnafiatrici, autotrebbiatrici, autogru, autosaldatrici, ets. Sh.So. 990.

d) Imposta fissa dovuta per il trasporto di persone, debitamente autorizzato, con gli autoveicoli adibiti al trasporto di cose di cui alla lettera d) dell' Art. 7: Sh.So. 3.330.

Xeer-Sharci lambar 2, taariikh 8.4.1969: Canshuurta lahaanshaha baabuurta yaryar ee isticmaalka gaar ahaaneed.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qodobka 69aad ee Dastuurka;

ISAGOO ARKAY: Sharci lambar 5 ee 5.11.1966;

ISAGOO ARKAY: Sharci lambar 4 ee 10.12.1962;

ISAGOO GAROWSADAY: Muhiimadda siyaasadeed iyo dhaqaale ay leedahay in la saaro canshuur lahaanshaha baabuurta yarayar ee isticmaalka gaar ahaaneed;

IYADOO UU SOO JEEDIYEY: Wasiirka Maaliyadda iyo Lacagta;

ASAGOO TIXGELIYEY: Oggolaanshaha Golaha Wasiirrada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Abuurista Canshuurta

Waxaa la abuuray canshuurta lahaanshaha baabuurta yaryar ee isticmaalka gaar ahaaneed (uso privato).

Qod. 2aad

Canshuur bixiyaha

Canshuurta lahaanshaha baabuurta yaryar waxay ku ku waajibtaa qof kasta oo ah dabiici ama qaanuuni, rayid ama Dawlo (enti pubblici).

Qod. 3aad

Canshuur dhaaf

Canshuurta lahaanshaha baabuurta yaryar waxaa ka deysan:

1. Baabuurta ay leeyihiin hay'adaha ku xusan Qod. 5aad ee Sharci lambar 4 ee 28ka Disember 1965.

2. Baabuurta ay leeyihiin Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed iyo Ururradiisa Bulshada.

3. Baabuurta lagu soo dejiyey si ku meel gaar ah oo ay leeyihiin qof ama hay'ad dibedda deggan (temporanea importazione).

4. Baabuurta cusubi waa ka deysan yihiin canshuurta sannadka 1aad ee uu soo degay.

Qod. 4aad

Boqolleyda canshuurta iyo qiimo dhaca baabuurta

1. Boqolleyda canshuurta lahaanshaha baabuurta yaryar waa 3/000 (kunkiiba saddex).

2. Qiimaha baabuurta waxaa sannad kasta la dhimmaaya 1/5 oo ah qiimo dhac.
3. Sannadka shanaad wixii ka dambeeya canshuurta baabuurka waxay noqoneysaa mid la eg sannadka 5aad.

### Qod. 5aad
### Qiimaha Baabuurta

1. Qiimaha baabuur kasta waxuu ka koobmayaa qiimaha uu ku soo degay oo lagu dalay canshuurta furdada.

2. Haddii la waayo dokumenti sugaaya qiimaha ku xusan lambarka sare waxaa la raacayaa qiimaha ku qoran tabeellaha Sharcigan ku lifaaqan oo ah qayb ka mid ah Xeerkan Sharci. (Lifaaq A).

### Qod. 6aad

### Muddada iyo habka bixinta canshuurta

1. Canshuurta lahaanshaha baabuurta yaryar waxay waajibeysaa sannad kasta, 1da Jennaayo ilaa 28da Febraayo.

2. Waa bannaan tahay in canshuurta hafto lagu bixiyo waana in haftooyinku ayan ka badnaan saddex, midda ugu dambeysana aysan dhaafin 28da Disember ee isla sannadka.

### Qod. 7aad

### Baabi'idda iyo xumaashaha baabuurta

1. Haddii baabuurka la baabi'iyo ama dibedda loo dhoofiyo, Milkiiluhu waa in uu koobi ka siiyo Xafiiska Canshuuraha warqadda uu buugga iyo summadda baabuurka ugu celinayo Xafiiska Diiwaanka Baabuurta rayidka (PRA), sida uu farayo Qod. 46aad ee Sharciga Waddooyinka (Sharci Lr. 4 ee 10.12.1962).

2. Sidoo kale haddii baabuurku socodka ka joogsado muddo lix bilood dhan, Milkiilaha ama ciddii wakiil u ah waa in uu soo gaarsiiyo Xafiiska Canshuuraha wargelin.

3. Haddii Xafiisku oggolaado codsiga canshuur bixiyaha muddadaas uu fadhiyo baabuurku, wax canshuur ah kuma waajibeyso, lamase celinaayo tii hore loo qaaday.

### Qod. 8aad

### Waajibka canshuur bixiyaha iyo Xafiiska Canshuuraha

1. Qof kasta oo leh ama soo degsada baabuur ka mid ah kuwa Xeerkan sharci ku tilmaaman, waxaa waajib ku ah in u caddeyn gaarsiiyo Xafiiska Canshuuraha Toosan ee u

xilsaaran uruurinta canshuurta lahaanshaha baabuurta yar-yar muddo soddon maalmood gudahood ah laga bilaabo maalınta uu baabuurka furdada ka soo baxo.

2. Xafiiska Canshuuraha waxaa waajib ku ah isna inuu u furo gal uu ku keydiyo macluumaadka baabuur kasta iyo canshuur bixintiisa.

Qod. 9aad

Ganaax

1. La daahidda caddeynta ku xusan qodobka sare ee aan ka badneyn 60 maalmood iyo bixinta canshuurta kaddib 28ka Febraayo waxaa la saarayaa ganaax dhan 10%.

2. Daahidda dhaafsan 60 maalmood iyo qofkii lagu helo asagoon bixin canshuurta waxaa la saarayaa ganaax dhan 100%.

Qod. 10aad

Dhimista ganaaxa

Ganaaxa ku xusan lambarka labaad ee qodobka sare waxaa laga dhigayaa 1/6, haddii canshuur bixiyuhu uu isla markiiba bixiyo canshuurta ku waajibtay.

Qod. 11aad

Mas'uuliyadda bixinta canshuurta

1. Haddii Milkiiluhu uu geeriyoodo, bixinta canshuurta waxaa masuul ka noqonaya dhaxaltooyadiisa ama ciddii kale ee u xilsaaran Maamulka dhaxalka.

2. Sidoo kale, haddii qofka leh baabuurka canshuurta ku waajibtay uusan lahayn awood wax qabad (capacità di agire), ama uusan Dalka degganeyn, bixinta canshuurta waxaa masuul ka noqonaya cidda wakiilka u ah.

Qod. 12aad

Arrimo kala duwan

1. Mudada, habka xaqiijinta canshuurta iyo gaarsiinta digniinta canshuurta waxaa loo raacayaa axkaanta Qodobbada 47, 53 iyo 56 ee Sharciga Canshuurta Macaashka.

2. Waxaa kale oo loo raacayaa axkaanta qodobka 82 shuruudaha iyo habka lacag celinta.

3. Isla Sharciga la soo sheegay, qodobbadiisa 60 iyo 83 waxaa lagu dhaqayaa dacwooyinka ka dhasha fulinta shar-ciga iyo qasab ku uruurinta canshuurta lahaanshaha.

Qod. 13aad
Deynta canshuurta

Deynta canshuurta lahaanshaha waxay eelahay dabee-cad madani oo la mid ah rahmad darajada koowaad, lana baaba'eya baabi'idda baabuurka ay canshuurtu ku waajibtay.

Qod. 14aad
Xeer Hoosaad

Wasiirka Maaliyadda iyo Lacagta waxaa awood loo siiyey inuu soo saaro Xeer Hoosaad fulineed ee Xeerkan sharci.

Qod. 15aad
Baabi'in sharci

Sharci kasta ee ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan waa la baabi'iyey.

Qod. 16aad
Dhaqangal

Xeer Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxii-xo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda. Isla markaana waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacbiga si loogu rogo sharci.

Muqdisho, 8.4.1989

MADAXW)YNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

## TABEELLAHA QIIMEYNTA BAABUURTA

| XOOGGA/NOOCA BAABUURKA | QIIME Sh.So. |
|---|---|
| 1. Baabuurta xooggoodu yahay ilaa 800 C.C. | 427.000 |
| 2. Baabuurta xooggoodu u dhexeeyo 801/1000 C.C. | 650.000 |
| 3. » » » » 1001/1200 C.C. | 890.000 |
| 4. » » » » 2101/1400 C.C. | 1.100.000 |
| 5. » » » » 1401/1600 C.C. | 1.400.000 |
| 6. » » » » 1601/1800 C.C. | 1.600.000 |
| 7. » » » » 1801/2000 C.C. | 1.850.000 |
| 8. » » » » 2001/2200 C.C. | 3.100.000 |
| 9. » » » » 2201/2400 C.C. | 3.900.000 |
| 10. » » » » 2401/2600 C.C. | 4.200.000 |
| 11. » » » » 2601/2800 C.C. | 4.700.000 |
| 12. » » » » 2801/3000 C.C. | 5.200.000 |
| 13. L/Rover, L/Cruiser, Nissan Patrol, Ranjo Rover, Isuzu Trooper (St. W) iwm | 2.900.000 |
| 14. Kuwa sare oo ah nooca (P/Up) iwm | 2.250.000 |
| 15. Suzuki (St. W) iwm | 1.600.000 |
| 16. Suzuki (P/U) | 1.100.000 |
| 17. Toyota Hilux, Dadsun, Mazda P/U (Single cabin) | 850.000 |
| 18. Kuwa sare oo ah Double cabin, iwm. | 1.200.000 |

Xeer-sharci lambar 3, taariikh 8.4.1989: Abuurid canshuur lahaanshaha dhismaa daaraha ah.

MADAXWEYNAHA JDS

ASAGOO ARKAY: Sharci lambar 5 ee 5.11.1966;

ASAGOO ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka;

ASAGOO GAROWSADAY: Muhimadda siyaasadeed iyo dhaqaale oo ay leedahay canshuurta Dawladda Dhexe saaridda dhismaha daarta ah;

IYADOO UU SOO JEEDIYEY: Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda iyo Lacagta;

ISAGOO TIXGELIYEY: Oggolaanshaha Golaha Wasiirrada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer-sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Abuurista canshuurta lahaanshaha

Waxaa la abuuray canshuurta lahaanshaha ma guurtada daarta ah.

Qod. 2aad

Canshuur bixiyaha

Canshuurta lahaanshaha waxay ku waajibeysaa qof kasta oo ah dabiici ama qanuuni, rayid ama Dawlo oo leh MAGURRTO DAAR AH.

Qod. 3aad

Canshuur dhaaf

Canshuurta lahaanshaha waxaa ka deysan:

1. Daaraha ku xusan Qod. 16aad ee Sharciga macaashka (Sharci lambar 5 5.11.1966);

2. Daaraha Warshadaha, hoteellada iyo kuwa uu leeyahay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed iyo Ururradiisa Bulshada;

3. Sidoo kale daarta cusub wey ka deysan tahay canshuurta sannadka 1aad ee uu dhismuhu dhammaaday.

Qod. 4aad

Boqolleyda iyo saldhigga canshuurta

1. Boqolleyda canshuurtu waa 0.2% qiimaha daarta.

2. Qiimaha daartu wuxuu ka koobmayaa isku darka qiimaha dhismaha iyo kan dhulka oo lagu soo saarayo habka ku qeexan qodobbada soo socda.

Qod. 5aad

Qiimaha dhismaha iyo dhulka

Qiimaha dhismaha iyo dhulka waa lacagta ka soo baxda mugga daarta iyo baaxadda dhulka oo lagu dhufto qiyaasta u degsan daarjooyinka dhismaha iyo dhulalka.

Qod. 6aad

Darajooyinka dhismaha iyo dhulalka

1. Xagga Sharcigan, dhismayaasha iyo dhulalkuba waxay uqaybsan yihiin min afar darajo.

2. Darajada koowaad ee dhismaha waxaa noqon kara kuwa daboolkoodu yahay shub, ama geed saar (battuta).

3. Darajada labaad ee dhismaha waxaa noqon kara guryaha daboolkoodu yahay eternik ama tegola.

4. Darajada saddexaad waxaa noqon kara guryaha daboolkoodu yahay laamiyeeri una dhisan hab VILLA (ama, deggan hal qoys).

5. Darajada afraad waxaa noqon kara guryaha daboolkoodu yahay laamiyeeri, laakiin loogu talo galay qoysas badan.

6. Dhulalka degmooyinka Xamar waxaa noqon kara darajada koowaad kuwa ku yaal Degmada Xamar Weyne, Degmada Shingaani, xaafadda agagaarka Liido. agagaarka Isbitaalka Laseretti, agagaarka Isbitaalka Digfer, Xaafadda Dhagaxtuur ee Degmada Wadajir. dhulalka saarana laamiyada: Via Laseretti. waddada Balcad aadda min Baar FIAT ilaa Suuqa Xoolaha Waddada Soomaaliya, Waddada Kamaaluddiin Saalax Waddooyinka labada dhinac ka mara Xarunta Nabadsugidda Gobolka Banaadir Waddada aadda Villa Somalia, min teatarka ilaa Dugsiga 15 May. Dhulalka bari ka xiga Waddada Suuqii hore ee Xoolaha ilaa halka ay uga dhacdo Jidka Hawl-Wadaag, dhulalka ku yaal Waddada Maka Al-Mukarrama. Waddada aadda Afgooye. min dham-

maadka Waddada Maka Al-Mukarrama ilaa agagaarka Xarunta Ciidammada Asluubta, dhulalka ku yaal jidka soddonka, dhulalka ku yaal waddada 21ka Oktoobar, dhulalka ku yaal Waddada LENIN, dhulalka ku yaal jidka aada garoonka dayuuradaha, min Km. 4 ilaa Waddada aadda Xalane, xaafadda u dhexeysa Isgoyska Waddada Danwadaagta iyo Waddada Jaalle Siyaad iyo dhismaha galbeed kaga yaalla isla xaafaddaas.

7. Qaybta labaad waxaa noqon kara dhulalka saaran laamiyada ka baxsan kuwa ku taxan qaybta koowaad.

8. Qaybta saddexaad waxaa noqon kara dhulalka ku yaalla xaafadaha marka laga reebo kuwa qaybta koowaad iyo dhammaan Degmooyinka Xamar-weyne iyo Shingaani.

9. Qaybta afraad waxaa noqon kara dhulalka ku yaalla cerifka magaalada Xamar sida Deyniile, Gubadley, Waxaracadde, xaafadda Suuqa cusub ee dharkeynta-Wadajir.

10. Darajooyinka dhulalka ka baxsan Xamar waxaa lagu qeexayaa Xeer uu soo saaro Wasiirka Maaliyadda iyo Lacagtu.

Qod. 7aad

Qiimaha darajooyinka dhismaha Dhulka.

Darajooyinka dhismaha iyo dhulalka waxaa loo gooyey qiyaasta mid kasta ku hor qoran:

| DARAJADA | DHISMAHA | | | DHULALKA | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 1aad: | Sh.So. | 10.000 halkii mq.³ | | Sh.So. | 4.000 halkii m² | |
| 2aad: | » | 6.000 halkii m³ | | » | 1 500 » | » |
| 3aad: | » | 3.000 » | » | » | 1 000 » | » |
| 4aad: | » | 1.000 » | » | » | 100 » | » |

Qod. 8aad

Waajibaadka Xafiiska Canshuurta

1 Xafiiska Canshuuraha Toosan ee u xilsaaran uruurinta Sharciga ni jideynayo waxaa waajib ku ah in uu tirokoobo daaraha ka dhisan degaankiisa. Milkiile kastana uu gaarsiiyo ogeysiis uu ugu sheegayo darajada dhismihiisa iyo dhulka uu ku yaallo iyo canshuurta ku waajibtay.

2 Waajibaadkaas oo kale Xafiiska waxa uu ka saaran yahay dhismayaasha cusub ee ku soo kordha degaankiisa

Qod. 9aad

Awoodda Saraakiisha Canshuuraha Toosan

1. Saraakiisha canshuuraha toosan waxay awood u leeyihiin in ay galaan, saacadaha shaqada, dhismo kasta oo canshuuri ku waajibtay, iyadoo ujeedadadoodu tahay in ay eeg-biraan dhismahaas, xaqiijiyaanna canshuurta ku waajibtay.

2. Qof kasta oo is hortaaga xil gudashada kor ku xusan wuxuu muteysanayaa ciqaabaha ku xusan Qod. 505 ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed, haddii falku uusan keenin ciqaab intaas ka culus.

Qod. 10aad

Bixinta canshuurta

1. Canshuurta lahaanshaha Maguurtada waxay waajibeysaa sannad kasta waana in la bixiyaa laga billaabo 1da Jannaayo ilaa 30 Maarso ee sannad waliba.

2. Waa bannaan tahay in canshuurta lagu bixiyo haftooyin waase in fahtada ugu dambeysa aysan dhaafin 28 Disember isla sannadkaas.

Qod. 11aad

Ganaax

1. Qofkii canshuurta ku bixin waaya ilaa 30ka Maarso ama 10 maalmood gudahood kaddib mudada haftadu dhacday waxaa la saarayaa ganaax dhan 10% ee canshuurta baaqatay ama haftada dhacday.

2. Waxaa isna la saarayaa ganaax dhan boqolkiiba boqol qofkii canshuurta ku bixin waaya isla sannadka ay waajibtay gudihiisa.

3. Ganaax kuma waajibo canshuurta lagu xaqiijiyey wargelinta koowaad ee ku xusan qodobka siddeedaad ee isla Xeerkan-sharci.

Qod. 12aad

Dhimista ganaaxa

Ganaaxa ku xusan lambarka labaad ee qodobka sare waxaa laga dhigayaa 1/6, haddii canshuur bixiyuhu uu oggolaado canshuurta lagu soo dallacay.

Qod. 13aad

Masuuliyadda bixinta canshuurta

1. Haddii Milkiiluhu uu geeriyoodo bixinta canshuurta

waxaa mas'uul ka noqonaya dhaxaltooladiisa ama ciddii kale ee u xilsaaran maamulka dhaxalka.

2. Sidoo kale, haddii qofka leh dhismaha canshuurtu ku waajibtay uusan lahayn awood wax qabad (capacità di agire), ama uusan Dalka degganeyn, bixinta canshuurta waxaa mas'uul ka noqonaya cidda Wakiilka u ah.

Qod. 14aad

Arrimo kala duwan

1. Mudada, habka xaqiijinta canshuurta iyo gaarsiinta digniinta canshuurta waxaa loo raacayaa axkaanta qodobbada 47, 53 iyo 56 ee Sharciga canshuurta macaashka.

2. Waxaa kale ee loo raacayaa axkaanta qodobka 82 shuruudaha iyo habka lacag celinta.

3. Isla Sharciga la soo sheegay, Qodobkiisa 60aad iyo 83aad waxaa lagu dhaqayaa dacwooyinka ka dhasha Sharciga iyo qasab ku uruurinta canshuurta lahaanshaha.

Qod. 15aad

Deynta canshuurta

Deynta canshuurta lahaanshaha waxay leedahay dabeecad madani oo la mid ah rahmad darajada koowaad, lara baaba'aysa baabi'idda dhismaha ay canshuurtu ku waajibtay.

Qod. 16aad

Xeer hoosaad

Wasiirka Maaliyadda iyo Lacagta waxaa awood loo siiyey inuu soo saaro Xeer-hoosaad fulineed ee Sharcigan.

Qod. 17aad

Baabi'in sharci

Waxaa la baabi'iyey Sharci lambar 6 ee 12.2.1980, qaybta ku saabsan canshuurta qiimaha daaraha oo ay qaadaan Dawladaha Hoose iyo Sharci lambar 1 ee 9.6.1965 kuna saabsan xadeynta boqolleyda canshuurta qiimaha daaraha.

Waxaa kale oo la baabi'iyey xarafka (E) ee Qodobka 12aad ee Sharci lambar 5 ee 5.11.1966.

Qod. 18aad

**Dhaqangal**

Xeer Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda. Isla markaas waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacbiga si loogu rogo Sharci.

Muqdisho, 8.4.1989

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Xeer-sharci lambar 4, taariikh 8.4.1989: Kordhin canshuurta rukhsadda iyo cusbooneysiinta sannadka ee leysinka wadidda baabuurta iyo kordhin canshuurta tijaabada baabuurta.

MADAXWEYNAHA JDS

ASAGOO ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka;

ASAGOO ARKAY: Sharci lambar 4 ee 27.1.1961;

ASAGOO TIXGELIYEY: Baahida loo qabo in la kordhiyo canshuurta leysinka iyo tijaabada baabuurta;

AYADOO UU SOO JEEDIYEY: Wasiirka Maaliyadda iyo Lacagta;

ASAGOO TIXGELIYEY: Oggolaanshaha Golaha Wasiirrada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer-sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Canshuurta leysinka wadidda baabuurta iyo nuqul bixinta, waxaa laga dhigay Sh.So. 1.000 (kun).

2. Canshuurta cusboonaysiinta sannadka ee leysinka wadidda baabuurta waxaa laga dhigay Sh.So. 500 (shanboqol).

Qod. 2aad

Canshuurta tijaabada baabuurta guud ahaan, waxaa laga dhigay Sh.So. 1.000 (kun) halkii tijaababa.

Qod. 3aad

Xeer Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda. Isla markaa waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacbiga si loogu rogo sharci.-

Muqdisho, 8.4.1989

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Xeer-sharci lambar 5, taariikh 8.4.1989: Kordhin qiimaha iibsashada taargada baabuurta iyo mootooyinka.

MADAXWEYNAHA JDS

ASAGOO ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka;

ASAGOO ARKAY: Xeer Madaxweyne lambar 14 ee 21.1.1963 iyo beddelaaddii ka dembeysay;

ASAGOO TIXGELIYEY: Baahida loo qabo in la kordhiyo qiimaha lagu iibiyo taargada baabuurta iyo mootooyinka

AYADOO UU SOO JEEDIYEY: Wasiirka Maaliyadda iyo Lacagta;

ASAGOO TIXGELIYEY: Oggolaanshaha Golaha Wasiirrada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer-sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1 Qiimaha taargada baabuurta waxaa laga dhigay Sh. So. 10.000 (tobankun).

2. Qiimaha taargada rimoorkiyada waxaa laga dhigay Sh.So. 3.200 (saddex kun iyo laba boqol).

3. Qiimaha taargada mootooyinka waxaa lag dhigay Sh. So. 3.200 (saddex kun laba boqol).

Qod. 2aad

Xeer-sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda, isla markaa waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacbiga-si loogu rogo Sharci.

Muqdisho, 8.4.1989

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Xeer-sharci lambar 6, taariikh 8.4.1989: Wax ka beddelidda canshuurta keenidda (Dazio di importazione).

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka;

MARKUD ARKAY: Xeer Sharci lambar 5 ee 11.12.1968 iyo beddelaaddii ka dambeysay;

ISAGOO GAROWSADAY: In ay lagama maarmaan tahay in wax laga beddelo canshuurta keenidda;

AYADOO UU SOO JEEDIYEY: Wasiirka Maaliyadda iyo Lacagta;

ASAGOO TIXGELIYEY: Oggolaanshaha Golaha Wasiirrada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer-sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa wax laga beddelay canshuurta keenidda (Dazio di importazione) ee ku qoran Xeer-sharci lambar 5 ee 11.12.68 iyo beddelaaddii ka dambeysay (Tariffa Doganale).

Qod. 2aad

Bedeecadaha canshuurtooda wax laga beddelay waa kuwa Shaxda ku taxan ee halkan ku lifaaqan oo ah qayb ka mid ah Xeer-sharcigan.

Qod. 3aad

Xeer-sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda, isla markaa waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacbiga si loogu rogo sharci.

Muqdisho, 8.4.1989

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

L I F A A Q A

| TARIFF | DESCRIPTION OF GOODS | IMPORT DUTY |
|---|---|---|
| 50.09—50.10 | — Woven fabrics of silk and noil silk | 30% |
| 51.04 | — Woven fabrics of man made fibres | 30% |
| 52.02 | — Woven fabrics of metal thread | 30% |
| 53.11—53.31 | — Woven fabrics of animal hair | 30% |
| 54.05 | — Woven fabrics of flax or of ramine | 30% |
| 55.08—55.09 | — Other woven fabrics of cotton | 30% |
| 56.07 | — Woven fabrics discontinuous or waste | 30% |
| 57.11—57.12 | — Woven fabrics of other vegetable or pareryarn | 30% |
| 58.08—58.10 | — Tulle and other not fabrics | 30% |
| 59.07.—59.13 | — Impregnated and coated fbarics | 30% |
| 60.01—60.06 | — Knitted and erched goods | 30% |
| 61.01.—61.11 | — Articles of aparel and clothing accessories of taxtile fabric — other than knitted of crocned Goods | 30% |
| 62.01—62.05 | — Other made up textile articles | 30% |
| 34.01 | — Toilet soap including medicated soap | 40% |
| 34.02 | — Organic surface active agents, surface active preperation and washing pre_ perations whother or not containing. soap | 50% |

Xeer_sharci lambar 7, taariikh 8.4.1989: Dib u habeyn canshuurta diiwaangelinta baabuurta taargo Soomaaliga ah.

MADAXWEYNAHA JDS

ASAGOO ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka;

ASAGOO ARKAY: Sharci lambar I rep. ee 1.1.1960 iyo beddelaaddii ka dambeysay (Sharci lambar 3 ee 10.1.1978);

ASAGOO GAROWSADAY: In dib loo habeeyo canshuurta diiwaangelinta baabuurta summad Soomaaliga leh;

AYADOO UU SOO JEEDIYEY: Wasiirka Maaliyadda iyo Lacagta;

ASAGOO TIXGELIYEY: Oggolaanshaha Golaha Wasiirrada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Canshuurta diiwaangelinta ee kala gadashada baabuurta summad Soomaaliga leh waxaa laga dhigay habka «ad valorum» halkii markii hore ay ka ahayd «specifiso».

2 Boqolleyda canshuurtan waxay noqoneysaa 2% (boqolkiiba laba) ee qiimaha baabuurka.

Qod. 2aad

Waxaa la baabi'iyey sharci kasta ee ka soo horjeeda ama aan la socon karin Xeer sharcigan.

Qod. 3aad

Xeer Sharcigan waxa uu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda. Isla markaa waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacbiga si loogu rogo sharci.

Muqdisho, 8.4.1989

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Xeer sharci lambar 8, taariikh 8.4.1989: Wax ka beddelid canshuurta boollada.

MADAXWEYNAHA JRS

ISAGOO ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka;

ISAGOO ARKAY: Sharci lambar 6 ee 7.12.1966 iyo Sharci lambar 3 ee 10.1.1978;

ISAGOO TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in wax laga beddelo canshuurta boollada;

IYADOO UU SOO JEEDIYEY: Wasiirka Maaliyadda iyo Lacagta;

ISAGOO TIXGELIYEY: Oggolaanshaha Golaha Wasiirrada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer-sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Canshuurta boollada ee ku waajibta manifeska imaashada iyo bixidda Maraakiibta, Dayuuradaha, Doonyaha iyo Baabuurta, waxaa laga dhigay sida ku tifaftiran Lifaaqa (A) ee Xeer-sharcigan, kana mid ah isla Xeer-sharciga.

Qod. 2aad

1. Araajida caadiga ah boolladooda waxaa laga dhigay Shs. 50/= (konton) halkii arji.

2. Dokumentiga kale (atti civili bolladooda waxaa laga dhigay Sh.So. 30/= (soddon) halkii dokumenti (asal iyo nuqulba).

Qod. 3aad

Waxaa la baabi'iyey Sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Xeerkan-sharci.

Qod. 4aad

Xeer-sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda, isla markaa waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacbiga si loogu rogo sharci.

Muqdisho, 8.4.1989

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

| | | IMAATIN | BIXID |
|---|---|---|---|
| B— GAADIIDKA: | | | |
| 1. Maraakiibta | | | |
| — Ajnabiga | USD | 200 | 200 |
| — Soomaalida | » | 100 | 100 |
| 2. Doonyaha: | | | |
| — Kuwa tankoodu kasarreeyo 15 M/Tons | » | 50 | 50 |
| — Kuwa tankoodu uu ka hooseeyo 150 M/Tons | » | 20 | 20 |
| 3. DAYUURADAHA GANACSIGA (Commercial Lines) | | | |
| — Ajnabiga | » | 150 | 150 |
| — Soomaalida | » | 100 | 100 |
| Dayuuradaha kale | » | 50 | 50 |
| 4. BAABUURTA | | | |
| — Kuwa 4 Ton iyo wixii ka badan | » | 30 | 30 |
| — Kuwa ka yar 4 Ton | » | 10 | 10 |
| T— XAASHIDA RARKA (Bill of ladings and Airwaybills) | Sh.So. | 500 | 500 |

Xeer-sharci lambar 9, taariikh 8.4.1989: Wax ka beddelidda canshuurta dhoofidda.

MADAXWEYNAHA JDS

ASAGOO ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka;

ASAGOO ARKAY: Sharci lambar 20 ee 26.9.1988;
ASAGOO GAROWSADAY: In wax laga beddelo canshuurta dhoofidda;

AYADOO UU SOO JEEDIYEY: Wasiirka Maaliyadda iyo Lacagta;
ASAGOO TIXGELIYEY: Oggolaanshaha Golaha Wasiirrada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer-sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Qof kasta oo Muwaadin ah, ama ajnabi deggane ah, waxaa laga qaadayaa Sh.So. 3.000/= (saddexkun) halkii dhoofba.

Qod. 2aad

Waxaa la baabi'iyey Qodobka 2aad, faqraddiisa 2aad ee Sharci lambar 20 ee 26.9.1988.

Qod. 3aad

Xeersharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda, isla markaa waxaa loo dugbinayaa Golaha Shacbiga si loogu rogo sharci.

Muqdisho, 8.4.1989

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Xeer Wasaaradda Arr. Gudaha L. 12 ee 27 Juunyo 1989: Aqeensi Ururka Samafalka Afrikada Bari.

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharci lr. 30 ee 30.7.84 ee lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ISAGOO ARKAY: Qodobka 54/2 ee Xeerka Madaniga Soomaaliyeed lr. 37 ee 2.6.73;

ISAGOO ARKAY: Xeerka lagu dhisay Ururka Samafalka Afrikada Bari;

ISAGOO AQOONSADAY: Inay lagama maarmaan tahay Abuurista Urarrada noocani ah.

WUXUU GUDDOONSHAY

Qod. 1aad

Waxaa si rasmi ahaan loo aqoonsaday Ururka Samafalka Afrikada Bari, Ururkaas oo ujeedadiisu tahay Gacansiinta Horumarinta Miyiga, Beeraleyda Tamatarta yar, Kalluumeysatada Degmooyinka Xeebaha; Taageeridda Dadka Saboolka ah, Dhisidda Maashaariic Caafimaad sida Bukaan socod Eegtooyin.

Sod. 2aad

Ururka Saldhiggiisu wuxuu noqonayaa Magaalada Muqdisho, wuxuuna laamo ku yeelan karaa Gobollada.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Wasiirka Arrimaha Gudaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Dowladda.

Muqdisho, 27.5.1998

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA
(S/Guuto Axmed Suleymaan Cabdalla)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle C/raxmaan Yuusuf Magan;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kayd Lam. 863 lagana sameeyey Laanta Hodon ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 357.935.58 kuna qoran magaca J.le Cabdullaahi Aadan Axmed sida ku cad warqadda lam. —— ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hodon;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kaydka Lr. 863 lagana sameeyey Laanta Hodon ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Shs. 357.935.58 kuna qoran magaca Cabdullaahi Aadan Axmed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Hodon ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le C/raxmaan Yuusuf Magan lacagta ca. Cadkeedu yahay Sh.So. 357.935.58 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 19.6.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 149

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Xasan Axmed;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. lam. 1458628-1458629 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna kala jirto min Sh. So. 100.000 ku kala qoran magacyada J.le Maxamed Jabriil Yoonis iyo J.le Xasan Axmed Cabdi sida ku cad warqadda Lam 5536 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee lam. 1458628-1458629 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto guud ahaan Sh.So. 200.000 ku kala qoran J.le Maxamed Jabriil Yoonis iyo J.le Xasan Axmed Cabdi.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta in ay siiso J.le Maxamed Xasan Axmed lacagta ay dadeedu tahay Sh.So. 200.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka varayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 4.6.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 150

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Jaamac Warsame;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0092923 oo laga sameeyey Laanta Burco ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, sida ku cad warqadda Lr. 4164

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0092923 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 500.000 kuna qoran magaca J.le Cabdiraxmaan Cusmaan Suldaan lagana sameeyey Laanta Burco ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Burco ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Maxamed Jaamac Warsame lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 500.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 24.4.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 151

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Sahra Warsame Cilmi;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. lam. 0372176-0372177 lagana sameeyey Laanta 1aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna kala jir-to min Sh.So. 500.000 guud ahaan Sh.So. 1.000.000 kuna qo-ran magaca J.le Warsame Cilmi Gootaale sida ku cad war-qadda lam. 5644 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaa-liyeed Q.X.Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lam 0372176-0372177 lagana sameeyey Laanta 1aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 1.000.000 kuna qoran magaca Warsame Cilmi Gootaale.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 1aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Sahra Warsame Cilmi Gootaale lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 1.000.000 oo ah bedelkii Jeegagga Wareega ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS. haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho. 2.7.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 152

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdul-qaadir Muuse Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0444317 lagana sameeyey Laanta 2aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Somaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 500.000 kuna qoran magaca J.le Saalax Cabdalla Mu-nasar sida ku cad warqadda lam. 5630 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.Guud:

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0444317 lagana sameeyey Laanta 2aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Shs. 500.000 kuna qoran magaca Saalax Cabdalla Munasar.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 2aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Cabdulqaadir Muuse Maxamed lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 500.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horrey-sa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 2.7.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 153

MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA

MGH/23/88 Hargeysa, 2[illegible].4.1988

55. Dalbasho Cusboonaysiin Jeegga Wareega ee lumay lambar yahay 0590736 ee Sh.So. 50.000 kuna qoran [illegible] C/naasir Nuur lamana garanaayo [illegible] laga [illegible] iyo [illegible] la sameeyey.

Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga iyo Codsiga ee uu soo qoray Axmed Maxamed Samatar ee uu ku codsanaayo in loo cusboonaysiiyo Jeeggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusan;

MARKUU ARKAY: Taarka Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Hargeysa ee uu Bangigu u kala diray laamaha iyo [illegible] guud ee 4.2.1988;

MARKUU ARKAY: Waraaqda Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Hargeysa ee lambar yahay 001472 ee 17.2.88 ee uu Bangigu ku soo caddeeyey inuu Jeeggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusan uu iska leeyahay Astaamaha kor ku wada xusan;

MARKUU ARKAY: In Lacagta ku qoran Jeeggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusan uu iska leeyahay ninka la yiraa Axmed Maxamed Samatar;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.1965kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In Jeeggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusan la kansal gareeyo, loona cusboonaysiiyo ninka la yiraa Axmed Maxamed Samatar, cusboonaysiintana gacanta laga saaro isaga ama ciddii awood buuxda ka haysata muddo 15 maalmood gudahood ahood.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Hargeysa in uu Nuqulka go'aankan ku dhejiyo Bangiga Irdihiisa si ciddii haysata Jeeggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusan ay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

K.S.Guddoomiyaha Maxkamadda G.W/Galbeed Hargeysa
(Maxamed Yuusuf Caynaan)

Kaaliyaha Max. G.W/Galbeed Hargeysa
(Axmed Wacays Maxamed)

L. 154

SHIRKADDA KAAH PHOTOGRAPHIC SUPPLIES LIMITED
S. P. A.

OGEYSIIS FADHI SHIR AAN CAADI AHAYN

Dhammaan shirkadleyda ee shirkadda KAAH PHOTOGRAPHIC SUPPLIES LIMITED S.P.A. waxaa la ogeysiinayaa in maalinta 20ka bisha Luuliyo ee sanadka 1989, Saacaddu markay tahay 10ka ee gelinka hore, xafiiska Nootaayaha Dr. Maxamuud Xuseen Diirshe, oo ku yaalla Muqdisho luuqa Waddada Roma, lagu qaban doono fadhiga shirka aan caadiga ahayn ee isla shirkaddaas kor ku magacaaban.

Arimaha shirkaas looga hadli doono waa kuwa soo socda:

1. Kordhinta hantida shirkadda;
2. Arrin kasta oo kale oo fadhiga la keeno.

Fadhiga shirka waxaa ka soo qayb geli karaa shirkadleyda magacyadooda lagu qoray Diiwaanka Shirkadleyda, ugu yaraan shan (5) maalmood ka hor maalinta shirka loo cayimay in uu fariisto, iyo kuwa oo isla muddadaas dhexdeeda saamiyaalkooda ay soo dhigeen Saldhigga shirkadda ama Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed — Laanta Xaruunta — Muqdisho.

Waxaa Shirkadleyda laga codsanayaa in ay yimaadaan fadhiga shirkaas, ayna dhowraan saacadda fadhiga loo cayimay inla qabto.

Muqdisho, 20.6.1989

MAAMULAHA KELI AH
( CALI MAXAMED MAXAMUUD )

L. 155

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Xuseen Cumar Barre;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 624244 lagana sameeyey LaantaBoorame ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 45.000 kuna qoran magaca J.le Ibraahim Jibriil Riiraash sida ku cad warqadda Lr. 6360 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 624244 lagana sameeyey Laanta Boorame ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 45.000 kuna qoran magaca Ibraahim Jibriil Riiraash.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Boorame ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Xuseen Cumar Barre lacagta cadad keedu yahay Sh.So. 45.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 27.6.1989
L. 156

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdullaahi Ibraahim Maxamuud;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 1586461 lagana sameeyey Laanta 2aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Maxamed Faarax Ciise sida ku cad warqadda lam. 6335 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY.

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 1586461 lagana sameeyey Laanta 2aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Shs. 100.000 kuna qoran magaca Maxamed Faarax Ciise.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 2aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Cabdullaahi Ibraahim Maxamuud lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan kayarayn 15maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Iasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 24.6.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L 157

MAXKAMADD AGOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Axmed Xersi Raage;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0093745 lagana sameeyey Laanta Q.X.G. ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 105.000 kuna qoran magaca Jaalle Axmed Xersi Raage sida ku cad warqadda lam. 6464 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.G;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0093745 lagana sameeyey Laanta Burco ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 105.000 kuna qoran magaca Axmed Xersi Raage.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Burco ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Jaalle Axmed Xersi Raage lacagta cadadkeedu yahay Sh.So 105.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Lasmiga ah ee JDS haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 28.6.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 159

MAXKAMADDA RACFAANKA G. MUDUG

LAM.— MR/MG/14/89 Kaalkasyo, 20.6.89

UJEEDDO:- Baafin Jeegga Wareega Lr. A-1575050 ee 27.5.89 Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanka G. Mudug Kaddib

HADDUU ARKAY: Codsiga ay soo qoratay Jaalle Aamina Nuur Faarax ku saabsan baafin Jeegga Wareega ee lumay Taariikh 16.6.89;

HADDUU ARKAY: Ogeysiiska Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Kaalkacyo ee ku taariikhaysan 20.6.89, iyadoo ay Jeegga ku qornayd Sh.So. 100.000;

HADDUU ARKAY: In Jeegga Wareega ee Lambarkiisu kor ku xusan yahay laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley Xamar;

HADDUU ARKAY: Qodobka 69-65 Xeer Sharci ahaan Lr. 2 ee 9.9.65;

HADDUU ARKAY: In Jeegga Wareega ay iska lahayd J.le Aamina Nuur Faarax, kuna qornayd lacag dhan Sh.So. 100.000;

HADDUU OGAADEY: In ay maqan tahay Maxkamadda Gobolka Mudug Gaalkacyo.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Jeegga Wareega ee kor ku xusan J.le Aamina Nuur Faarax, marka ay ka soo wareegto muddo (15) casho gudahood laguna shaaciyo Xafiiska Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

WUXUU AMRAYAA OO KALE

In Jeegga cusub oo la sameyn doono gacanta laga saaro J.le Aamina Nuur Faarax amase cid wakaalad sharci ah ka haysata.

Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanka G/Mudug
(Dr. Cabdullaahi M. Dheegsan)

L. 158

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDU UARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Saleebaan Abshir X. Diiriye;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen 13 Jeeg War. Lambarradooduna kala yihiin sidatan:_

| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | | | Laanta |
|---|---|---|---|---|---|
| 1618982 | 100.000 | Axmed | Maxamed | Axmed | L/caanood |
| 1618983 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1618984 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1618985 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1618986 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1618987 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1618988 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1618989 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1618990 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1618991 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1618997 | 100.000 | » | » | » | » |
| 0823416 | 23.000 | Maxamed | Yuusuf | Saalax | Boosaaso |
| 0149549 | 20.000 | Cabdiraxmaan | Yuusuf | Maax | » |

lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha kor ku xusan kuna jirto dhammaan lacag dhan Sh.So. 1.143.000 sida ku cad warqadda lam 7115 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q X.Guud:

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga L. 2 ee 9 9 1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku xusan lagana sameeyey Laamaha kor ku tilmaaman ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 1.143.000.

WAXAA LA AMRAYAA

Laamaha kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiyaan Jaalle Saleebaan Abshir X. Diiriye lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 1.143.000 oo ah bedelkii Jeegagga Waieega ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 18.7.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 160

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY. Arjiga uu soo qortay Jaalle Sh. Cabdi Sh. Cabdullaahi;

HADDUU TIXGELIYEY; In uu dhumay Buug Kayd Lr. 3024 lagana sameeyey Laanta Wadajir ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh. So. 460.018.92 kuna qoran magaca J.le Sh. Cabdi Cabdullaahi sida ku cad warqadda lam. 203 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lr. 3024 lagana sameeyey Laanta Wadajir ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Shs. 460.018.92 kuna qoran magaca Sh. Cabdi Cabdullaahi.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Wadajir ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Sh. Cabdi Cabdullaahi lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 460.018.92 oo ah bedelkii Buug Kayd-ka kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 10.7.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 161